



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Acacia McGuire Anderson, Isku duwaha Employment First ee Gobolka

Ujeedada: Joojinta Ilaalinta Adeegyada Aqoon isweydaarsiga ee ODDS-dhaqaalihiisa bixiso

Sibtambar 2020 waxay astaan u tahay joojinta ilaalinta adeegyada aqoon isweydaarsiga ee ODDS-dhaqaalihiisa bixiso ee ka jira Oregon. Waxaan doonaynaa in aan aqoonsano dadaalka weyn ee ay sameeyeen dadka u dooda naftooda, qoysaska, daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadka kale si ay uga dhigaan in tani dhacdo intii lagu jiray tobankii sano ee la soo dhaafay. Dadaaladani waxay keeneen in dhawaan [Guddiga Xuquuqda Madaniga ah ee Maraykanku](#) ay Oregon u aqoonsadeen in ay tahay horseedka tirtirida mushahar ugu yar iyo u wareegista shaqada isku dhafan.

Nidaamka adeeg ee Oregon ee loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) waa mid muhiimada la siinayo oo ku saleysan taageerooyinka bulshada. Markii ay Oregon hirgelisay siyaasadii Shaqadaa u Horreysa 'Employment First' waxaan dejinay hadaf ah in qof kasta oo qaba I/DD – iyada oo aan la eegayn darnaanshaha naafanimadooda – uu ka shaqeyn karo bulshada dhexdeeda isla markaana heli doono taageerooyinka ku habboon.

Si dardar leh ayay wax u sii socdaan marka la eego Amarkii Fulineed ee u horreeyay ee Guddoomiyaha Gobolku soo saartay 2013-kii ee ku saabsanaa Shaqadaa u Horreysa 'Employment First', kaasi oo ODDS, Tababarka Dhaqancelinta iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon lagaga codsaday, in ay ka wada saqeeyaan sidii loo beddeli lahaa dhamaan nidaamyadayada adeeg si loo soo saaro natiijooyin shaqo oo wanaagsan.

Amarada Fulineed oo dheeraad, oo ay weheliyaan Heshiiska Wax lagu xalinayo ee Lane Lane v. Brown iyo xeerarka Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku saleysan (HCBS), ayaa sii waday in ay nidaamka Oregon ka wareejiyaan adeegyada shaqo ee xarunta ku saleysan oo u wareejiyaan shaqada isku dhafan ee bulshada ku saleysan.

Tan iyo markaasi, waxaanu aragnay nidaamka gobolka oo dhan oo isku yimid iyaga oo adeeg bixiyayaashu wax ka beddeleen qaabkoodii ganacsi oo ahaa mid diirada saarayay xarumaha waaweyn oo ka dhigeen mid horumariyayaasha shaqada iyo tababarayaasha shaqadu taageeraan goobaha shaqada ee bulshada. Isku duwayaasha Adeegyada, Wakiilada Shakhsiyeed iyo la taliyayaasha Tababarka Dhaqancelinta ayaa si dhow ula shaqeeyay dadka qaba I/DD iyo qoysaskooda si loo aqoonsado shaqo wanaagsan oo isku dhiganta.

Tan iyo 2015, [tirada dadka qaba I/DD](#) ee ka shaqeynaya shaqada bulshada ayaa seddex jibaarantay. Waxaanu sidoo kale aragnay isbeddel dhanka dhaqanka ah – iyada oo dadka mararka qaarkood qornaa in ay yihiin kuwo aan shaqo loo qaadan karin “unemployable” ay muujiyeen qiimaha weyn oo ay ku leeyihiin shaqada haddii la siiyo fursad. Dadka qaba I/DD ayaa ka shaqeynaya xafiisyada iyo dukaamada, dadka gaarsiinaya alaabada, jilaya ciyaaraha, oo ka qayb qaadanaya noloshada buuxda ee bulshada. Waxaan haynaa in ka badan 90 [sheekooyin](#), [fiidiyowyo](#), iyo [warbaahinta ‘podcasts’ oo guul leh](#) oo tilmaamaya shaqada wanaagsan ee ka socota gobolka oo dhan ee ay wadaan dadka, ganacsiyada, adeeg bixiyayaasha, shaqaalaha iyo maamulayaasha kiiska ee ka tirsan adeegyada shaqada ee bulshada.

COVID-19 iyo dhibaatooyin kale oo sanadkan dhacay ayaa caqabad ku noqday qof kasta. Xataa inta lagu jiro waqtiyadani, dad badan oo qaba I/DD ayaa sii wada in ay shaqeeyaan iyada oo shaqo-bixiyayaal badan, oo aanan wali awoodin in ay dib u furmaan, ay muddo bilo ah ku adkeysanayeen in ay hayaan/kaydiyaan shaqooyin diyaar ah oo loogu talagalay shaqaalahooda qaba I/DD. Tani waxay markaati u tahay qiimaha dadka qaba I/DD ay ku soo kordhiyaan shaqada. Ma aha guul sahlan in wax laga beddelo nidaam adeeg oo dhan sida ay sameysay Oregon. Waxay tusaysaa in marka aanu wada shaqeyno, aanu gaari karno isbeddelada ay dadka u dooda naftooda aan sida nasashada lahayn uga soo shaqeeyeen.

Waad mahadsan tihiin dhammaantiin dadaalkiina joogtada ee aad ugu adeegaysaan dadka qaba with I/DD iyo qoysaskooda, iyo dadaaladiina aad Oregon kaga dhigaysaan horseedka taageerooyinka iyo adeegyada ku saleysan bulshada.

Si Daacadnimo leh,

Lilia iyo Acacia

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.